



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 012/2011

Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay oo madaxda Soomaaliyeed ku amaanay horumarka ay ka sameeyeen hirgelinta Heshiiskii Kampala

Nayroobi, 15 Luulyo 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, Danjire Augustine P. Mahiga, ayaa ugu hambalyeyay madaxda siyaasadda Soomaaliyeed, gaar ahaan Madaxweyne Shariif Sheekh Axmed iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka Shariif Xasan Sheekh Aadan iyo Baarlamaanka Federaalka Ku Meelgaarka Soomaaliyeed sida ay u muujiyeen inay ka go'antahay meelmarinta nabadda iyagoo hirgelintaya Heshiiskii Kampala iyo sida dhakhsaha leh ee uu Baarlamaanka Soomaaliyeed u ansaxiyat heshiiska.

“Waxaan aad ugu faraxsanahay in madaxda hay’adaha federaalka ku meelgaarka Soomaaliyeed ay horumar ka sameynayaan hirgelinta Heshiiska, ayuu yiri Mahiga oo ah madaxa Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha siyaasadda Soomaaliya (UNPOS). “Waxaan ku hanweynahay in dhowaan la magacaabo lana ansaxiyo Golaha Wasiirada kuwaasoo ah kuwo loo dhanyahay, tayo leh, dadweynaha wada ogolaadaan.”

Ergeyga Gaarka ah wuxuu hoosta ka xarriiqay muhimadda ay leedahay qabsoomidda shirka wadatashiga ee soo socda kaasoo lagu soo gabogabeynayo xilliga ku meelgaarka. Ergeyga Gaarka ah wuxuu kaloo yiri waa in shirka lagu qabtaa gudaha Soomaaliya inta uusan dhammaanin xilliga ku meelgaarka ah inta ka horeysa 20ka Agoosto. Ergeygu wuxuu ammaanay guddiga qabanqaabada (shirka) kaasoo ka kooban wakiillo ka kala socda Dowladda Federraalka KMG, Baarlamaan Federraalka KMG, Puntland iyo Galmudug.

“Waxaan u baahanahay inaan ka faa’iideysano fursadda wanaagsan ee hadda jirta, ayuu yiri Dr. Mahiga. “Shirkana wadatashiga wuxuu horumarinaya habkii lagu dhammeyn lahaa xilliga kalaguurka, waxaa kaloo uu adkeynayaan rabitaanka siyaasadeed ee hadda jira kuna saleysan Heshiiskii Kampala.”

Shirka wadatashiga, oo waqtiga iyo meesha lagu qabanayo aan weli la go’ansan, wuxuu kaalin ka cayaari doona la xiriirka dadka (ay arrintu khuseyso). Shirkan wuxuu kaloo isu keenayaa dhinacyada kala geddisan ee qaybaha dowladda iyo bulshada rayidka.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback / Susannah Price

Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6898/ 6805 ama +254739976888 / 0733902020

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

www.unpos.unmission.org



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

Wuxuuna si guud gacan uga geysan doonaa habka lagu ansaxinayo qorshe hawleedka dowladda, kaasoo ahaan doono mid guud oo loo wada dhanyahay.

Qorshe hawleedka waxaa laga filayaa inuu qeexo waxqabadka Xukuumadda sannadka soo socda, wuxuuna siyaasad ahaan u hagi doonaa xukuumadda cusub, wuxuuna horumarin doonaa hanaan ku saleysan wadajir iyo xasillooni. Qorshuhu wuxuu xoogga saari doonaa arrimaha ugu muhimsan iyo shuruudaha la doonayo in laga soo baxo (meelmarinta amaanka, dastuurka, dibuhabaynta hay'adaha, dibuheshiisiin siyaasadeed iyo diyaarinta doorashooyinka), kala saaridda mas'uuliyaadka la xiriira hirgelinta heshiiska. Qorshuhu wuxuu xambaarsanyahay waqtigii lagu hirgelin lahaa, dhaqaalaha loo baahan yahay in lagu hirgeliyo, abaabul iyo u hogaansanaan (gaar ahaan sameynta hanaan isuduwid iyo kormeer iyo hay'ad siyaasadeedda madaxda dowladaha gobolka).

“Qorshe hawleedku waa inuu ahaadaa mid leh ujeeddooyin xaqiiqada ku salaysan lana gaari karo, ayuu yiri Dr. Mahiga. “Dibueegidda qorshahan wuxuu madaxda Soomaaliyeed siinayaa fursad ay ku helaan taageerada iyo ka soo qaybgalka dadweynaha Soomaaliyeed. Wuxuu kaloo muujinayaa sida ay madaxda Soomaaliyeed uga go’antahay inay horumar ku sameeyaan 12ka bilood ee soo socda.

“Ujeeddada kama dambeystu waxay tahay in la arko Soomaaliya oo hesha xasillooni ay u wada dhanyihii dadka Soomaaliyeed oo ay dhexdoodana heshiis iyo nabad ka dhacdo deriskooda nabad la ah, lehna dowlad metesha oo u adeegi karta muwaadiniinteeda. Wuxuu qorshe hawleedkan u arkaa tallaabo aad muhim u ah oo loo qaaday sidii lagu gaari lahaa arrimahan.”

Ergeyga Gaarka ah wuxuu yiri waxaa nasiib darro ah in horumarka siyaasadeed iyo amaan ee hadda socda ay ku soo beegmeen waqtii ay dhibaato xoog leh ummadda Soomaaliyeed ka haysato abaaraha dalka ka jira, taasoo waxyeelleyssay dad ku dhow saddex milyan oo qof.

“Dhibaatada xagga bani’aadanka ee hadda Soomaaliya ka jirta waxay u baahantahay wax ka qabasho degdeg ah”, ayuu yiri Mahiga. “Xoghaya Guud laftiisa ayaa horsed u ah baaqa Qaramada Midoobay ay u jeedinayso in caalamku uu kaalmo ka geysto badbaadada dadka. Waqtii noo ma harin.”

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback / Susannah Price

Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6898/ 6805 ama +254739976888 / 0733902020

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

www.unpos.unmission.org